# Burcadda iyo Ganacsigaaga Yar:

## Hagaha Ganacsigaaga

Somali



Marka burcaddu ay dabagasho ganacsigaaga iyo ururkaaga khayriga ah, waxay dhaawici karaan sharaftaada iyo ujeedadaada. Waa maxay difaacaaga ugu wanaagsan? Baro calaamadaha lagu garto burcadda ganacsiyada bartilmaameedsata. Intaa kaddibna usheeg shaqaalahaaga iyo saaxiibadaa waxa loo baahanyahay inay sameeyaan si ay isaga ilaaliyaan burcadda.

---

- **Xeeladaha Burcaddu adeegsato**
- **Ilaasho Ganacsigaaga**
- **Burcadda Badanaa Bratilmaameedsata Ganacsiyada Yaryar**
- **Nidaamyada Kale ee Wax la iskaweydiin karo**

---

## ► Xeeladaha Burcaddu adeegsato

- **Burcaddu waxay iska soo dhigaan qof aad aaminsan tahay.** Waxay iska dhigaan shirkad ama hay'ad dowladeed oo aad taqaano si aad lacag u siiso. Laakiin waa burcadnimo.
- **Burcaddu waxay kugu abuurayaan dareen degdeg, handadaad, iyo cabsi isugu jira.** Waxay rabaan in aad howl qabato kahor inta aadan fursad u helin hubinta sheegashadooda. Qofna ha u ogolaan in uu kugu dadajiyo in aad lacag siiso ama aad siiso macluumaad ganacsi oo xasaasi ah.
- **Burcaddu waxay kuu sheegayaan in aad lacagta ku bixiso nidaam gaar ah.** Waxay inta badan kaa dalbanayaan in aad lacagta ugu dirto xawilaad, nooc kiribto ah, kaararka wax lagu iibsado. Marna lacag ha u dirin qof nidaamkaan wax kugu weydiisanaya. Waa burcadnimo.

## ► Ilaasho Ganacsigaaga

### Tababar sii Shaqaalahaaga

- Difaaca ugu wanaagsan waa shaqaale wacyigoodu sareeyo inaad haysato. Ku tababar shaqaalaha in aysan ku dirin baaswaarada ama macluumaadka xasaasiga ah iimayl, xataa haddii iimaylku u muuqdo mid ka yimid maareeye. U sharrax shaqaalahaaga qaabka burcadnimadu u dhacdo kuna dhiirigeli in ay la hadlaan shaqaalaha saaxiibadood ah haddii ay ka shakiyaan wax burcadnimo ah. Ka dalbo nuqulo bilaash ah oo buugaan ah **ftc.gov/bulkorder** lana wadaag shaqaalahaaga.

### Xaqiiji Qaansheegadyada iyo Lacag bixinada

- Xaqiiji in nidaamyada hubinta wax iibsiga iyo qaansheegadyadu yihiin kuwo cad waxaadna

shaqaalahaaga u sheegtaa in ay si dhow u hubiyaan qaansheegadyada oo dhan. Ka taxaddar qaabka qofku kuu weydiinayo inaad lacagta u siiso una sheeg shaqaalahaaga in ay sidoo kale sameeyaan. Haddii qof uu ku weydiisto inaad lacagta ugu dirto xawilaad, lacagaha kiribto, ama kaararka wax lagu iibsado, ha u dirin wax lacag ah. Waa burcadnimo.

## Burcadnimada la Xiriira Aaladaha Caseriga ah

- Maadaama burcaddu ay markasta ka beensheegaan lambaradooda teleefoonka, marna ha aaminin caller ID-yada. Haddii aad hesho iimayl ama farriin qoraaleed aadan filayn, marna ha riixin lifaaqa, ha furin wax ku lifaaqan, hana soo dajin wax faylal ah. Sidaasi waa qaabka burcaddu ay nidaamkaaga u dhexgalinayaan nidaam jabsanaya (malware) ama waxay isku dayayaan inay kugu qanciyaan in aad lacag u dirto ama aadla wadaagto macluumaad xasasi ah. Burcaddu waxay xaataa mararka qaar jabsadaan baraha bulshada dadka aad taqaano, ayaga oo kuu soo diraya fariimo u muuqda kuwo sax ah — laakiin ma ahan. Baro sida burcadda interneetka iyo jabsadeyaasha looga ilaaliyo ganacsigaaga yar ama ururkaaga khayriga ah: ka eeg Ammaanka interneetka iyo Ganacsiga Yaryar **ftc.gov/cybersecurity**.

## Ogow Cidda aad la Tacaamulayso

- Kahor inta aadan ganacsi la samayn shirkad yar, ku baar magaca shirkadda oonleenka adiga oo ku baaraya “scam” ama “complaint.” Akhri waxyaabaha dadka kale ka sheegayaan shirkadda. Weydii dadka aad aaminsan tahay wixii talo bixin ah. Waxaad sidoo kale heli kartaa tallooyin ku saabsan horumarinta ganacsiga oo bilaah ah adiga oo adeegsanaya barnaamijyada sida **SCORE.org**.

# ▶ Burcadda Badanaa Bratilmaameedsata Ganacsiyada Yaryar

## Qaansheegadyada Bilaashka ah iyo Ganacsiyada Aan la dalban

Burcaddu waxay abuurtaan qaansheegadyo u muuqda in aad adigu u dalbtay badeecooyin ama adeegyo ganacsigaaga. Waxay rajaynayaan in qofka biilashaada bixiyaa uu u fahmi doono qaansheegadyada kuwo sax ah lacagtana uu bixin doono. Wax kalena maahane waa been abuur. Ama waxaa dhici karta in burcaddu kusoo wacaan, ayaga oo sheeganaya in ay doonayaan in ay “xaqiijiyaan“ dalab hadda taagan, “xaqiijinaya” ciwaanka goobta, ama ku siinaya nooc ama muunad “bilaash” ah. Haddii aad aqbasho wax kamid ah waxyaabahaas, badeecada aadan dalban ayay albaabkaaga kuugu keenayaan — waxaan la socda cadaadis fara badan oo ah in aad lacagta bixiso. Ha bixin lacagta. Xasuusnoowna, haddii aad hesho badeeco adaan dalban, waxaad xaq u leedahay in aad qaadato aadna u isticmaasho si bilaash ah.

## Burcadda Liiska iyo Xayaysiinta Onleenka ah

Burcaddu waxay isku dayayaan inay kugu siraan in aad bixiso lacagta xayaysiis aan jirin ama liiska nidaam ganacsi oo ana jirin. Waxaa dhici karta in ay kuweydiiyaan in aad siiso macluumaadkaaga xiriirka si “bilaash” ah, ama waxay dhahayaan wicitaanku waa kaliya “xaqiijinta” macluumaadkaaga. Intaa kaddib waxaad helaysaa biil fara badan, burcadduna waxay isticmaalayaan tafaasiisha — ama xataa wxaay duubayaan — wicitaankii hore si ay kuugu cadaadiyaan in aad lacagta bixiso.

## Burcadda Ganacsiga iyo Iskadhigistooda in ay Dowladda ka socdaan

Burcaddu waxay iskadhigaan in ay yihiin qof aad taqaano ama aad aaminsan tahay waxayna isku dayayaan in ay kugu cabsi galiyaan ama kugu dadajiyaan lacag bixinta ama in aad siiso macluumaad. Tusaale ahaan:

- Burcaddu waxay sheegaan in ay kaasoo wacayaan shirkad adeegyo bixisa adeegyadaada gaaska, korontada, ama biyuhuna ay qarka u saaran yihiin inuu khalkhal ku yimaado ayada oo ay sabab u tahay bixinta lacagytooda oo aad la daahday (been ah).
- Burcaddu waxay sheegaan in ay yihiin wakaaladaha dowladda waxayna kugu handadayaan in ay hakinayaan shatigaaga ganacsiga, ku ganaaxayaan, ama xataa ay maxkamad ku gaynayaan. Waxaa laga yaabaa inay u sababeeyaan in canshuur laguugu leeyahay ama aad u baahan tahay in aad soo cusboonaysiiso shatiga ama dib isu diiwaangaliso.
- Qaar kamid ah burcaddu waxay kugu qancinayaan in aad iibsato calaamadaha goobta shaqada loogu tala galay kuwaas oo aad si bilaash ah uga heli karto Waaxda Shaqaalaha ee Maraykanka.
- Qaar kamid ah burcaddu waxay kugu khayamayaan in aad lacag ku bixiso codsashada waxa loogu yeero deeqaha ganacsiga oo laga helo barnaamijyo ay dowladdu bixiso kuwaas oo hadhow been noqonaya.
- Burcaddu waxay iska dhigaan Xaafiiska Sumadaha Ganacsiga ee Maraykanka waxayna kuugu cagajuglaynayaan in aad sumaddaada ganacsi waayi doonto haddii aadan khidmad lacag ah si dhakhso ah u bixin. Marar kale, been ayay sheegaan waxayna dhahaan waxaa laguugu leeyahay lacag loogu tala galay adeegyo dheeraad ah.

- Qaar kamid ah burcaddu waxay sheegaan in ay kaa soo wacayaan shirkad qalabka teknoolojiyadd ah, ayaga oo kugu handadaya in ganacsigaagu waayi doono URL-ka websaytkisa haddii aadan si dhakhso ah lacag u bixin.

## Burcadda Taageerada Aaladaha casriga ah

Burcadda taageerada aaladaha casriga ah waxay ku bilowdaan wicitaan ama fariin dignii ah oo shaashaddaada soo fuulaysa. Burcaddu waxay iska dhigayaan in ay ka socdaan shirkad teknoolijiyadeed oo si weyn loo yaqaano, ayaga oo kuu sheegaya in dhibaato kajirto ammaanka kombuyuutarkaaga. Hadafku waa in ay lacagtaada helaan, kombuyuutarkaaga gudaha u galaan, ama labadaba. Waxaa dhici karta in ay kuu sheegaan in ay xalinayaan dhibaato aadan qabin, in aad ganacsigaaga ka diiwaangaliso barnaamij dayactirka kombuyuutarada ah oo aan jirin ama aan faa'iido lahayn, ama in ay kombuyuutarkaaga dhexgalaan ayna kaa qaataan xogta qarsoodiga ah ee ay u isticmaali karaan in ay xogtaada ku xadaan.

## Maskax ka xadista Bulshada, Burcadnimada internetka, iyo Xanibashada Kombuyuutarka

Burcadda internetku waxay ku khiyaami karaan shaqaalaha in ay usoo diraan lacag ama in ay siiyaan macluumaad qarsoodi ah ama xasaasi ah sida baaswaarka ama macluumaadka bangiga. Waxay inta badan ku bilaabataa iimaylo been abuur ah, xiriiro baraha bulshada ah, ama wicitaan u muuqda in uu ka imaanayo il la aamini karo — tusaale ahaan, korjooge ama shaqaale kale — kaasoo abuuraya degdeg ama cabsi. Iimaylada kale waxay u muuqan karaan codsiyo ku saabsan wax ka badalidda baaswaarada ee caadiga ah ama fariimaha kale ee ootamaatiga ah, laakiin dhab ahaantii waa iskudayo lagu doonayo in xogtaada lagu xado. Burcaddu waxay

sidoo kale adeegsan karaan maalweero ay ku xanibayaan faylasha ururka waxayna u haysanayaan madax furasho.

## Burcadda Tababarenimada Ganacsiga

Qaar kamid ah burcaddu waxay iibiyaan barnaamijyo tababaridda ganacsiga ah oo been abuur ah, ayaga oo inta badan adeegsanaya caddaymo, muuqaalo, siminaaro, iyo wicitaano suuq gayn oo been abuur ah. Waxay si been abuur ah u balanqaadaan natiijooyin cajiib ah haddii aad iibsato nidaamkooda gaarka ah ee "la xaqiijiyay" si ay ganacsiga ugu guulaystaan. Waxaa dhici karta in ay kugu siraan qiimo jaban, ayaga oo hadhow ku weydiisanaya kaliya kun doolar. Xaqiiqo ahaan, burcaddu waxay ganacsatada soo koraysa ka tagaan ayaga oo ana haysan kaalmadii ay rabeen laguna leeyahay kumanaan doolar.

## Badelidda Faalooyinka Onleenka ah

Qaar kamid ah burcaddu waxay sheegtaan in ay faallooyinka aan wanaagsanayn ee badeecadahaaga ama adeegyadaada badali karaan, ay ku dari karaan faallooyin wanaagsan, ama ay sare u qaadi karaan heerka dhibcahaaga meelaha wax lagu qiimeeyo. Si kastaba ha ahaatee, in faallooyin been ah lasoo dhigo waa sharci darro. Hagitaanada FTC waxay sheegayaan in tasdiiqinada — oo ay kujiraan faalooyinka — ay ka tarjumaan aaraa'da daacadda ah iyo waxyaabaha qofka tasdiiqayaha ah uu arkay.

## Burcada Diyaarinta Kaararka Wax lagu iibsado iyo Qalabka Kiraysiga

Qaar kamid ah burcaddu waxay balan qaadaan sicir hooseeya oo ah diyaarinta kaararka lacagaha la iskugu diro, ama heshiisyo wanaagsan oo ku saabsan kiraysiga qalabka. Burcadkaan waxay ka faa'iidaystaan qoraalo wanaagsan, qayb ahaan run ah, iyo been qayaxan si ay

u helaan saxiixa qandaraaska ee maamulaha ganacsiga. Qaar kamid ah wakiilada iibka ee been abuurka ah ayaa weydiista mulkiileyaasha ganacsiyada in ay saxiixaan dukumiintiyo maran. (Ha samaynin.) Qaarkood waxaa lagu yaqaanaa in ay qodobada badalaan kaddib marka la xaqiijiyo. U sheeg qofka iibiyaha ah inuu kuu keeno nuqulada dhammaanba dukumiintiyada saxda ah ee hadda iyo kuwii horeba. Haddii ay diidaan ama ay ku hakiyaan ayaga oo kuu balan qaadaya in ay hadhow gadaal kaaga soo dirayaan, arrintaasi waxay calaamad u noqon kartaa in aad la tacaamulayso burcad.

### Burcadda Jeegagga Beenta ah

Qaar kamid ah burcaddu waxay ku siinayaan wax u muuqda sababo macquul ah oo ku saabsan in ay lacag dheeraad ah kugu siiyeen jeegga. Intaa kaddib, waxay ku weydiinayaan inaad usoo celiso lacagta dheeraadka ah ama aad meel kale ugu dirto. Laakiin jeeggu waa been abuur, in kasta oo laga yaabo in uu kaagu muuqdo akoonkaaga mid la "cadeeyay". Marka la gaaro wakhtiga bangigu ogaanayo in jeeggu yahay mid been abuur ah, burcadku waaba helay lacagtii aad u dirtay. Waxaa lagaa rabaa inaad bangiga lacagtii usoo celiso.

## ▶ Nidaamyada Kale ee Wax la iskaweydiin karo

Mararka qaar burcaddu waxay isku qariyaan nidaamyada kale ee wax la iska weydiin karo — sida in ay bixinayaan shaqooyin lacago fara badan leh, kaddibna ay ku guuldarraystaan in ay kasoo baxaan balamahoodii samaynta lacagta ahaa. Ama waxaa dhici karta inay kaa iibiyaan adeegyo aadan u baahnayn ayaga oo si been ah kuugu sheegaya in aad u baahan tahay in aad lacag bixiso si aad sare ugu qaaddo warbixintaada daynta

ganacsiga. Marka ay musiibo dabiici ah dhacdana, qandaraasleyaal aan shati haysan iyo burcad ayaa kuula imaan kara balamo been ah oo ku saabsan in ay ganacsigaaga sidiidii kusoo celinayaan asaga oo shaqaynaya ayaga oo ku samaynaya dayactir degdeg ah, nadiifin, ama qaadista burburka taasoo aan waligeedba dhacayn.

## ▶ Baro waxyaabo intaan ka Badan

- Si aad u hesho tallooyin intaan ka badan oo ku saabsan ka ilaalinta ururkaaga burcadda, bookho **ftc.gov/SmallBusiness**.
- Ku xirnoow FTC adiga QoraaladGanacsiga ee FTC ka furanaya **ftc.gov/subscribe**.

## ▶ Soo sheeg

- Haddii aad aragto khiyaano, wac 877-382-4357, oo riix 3 wixii ku saabsan luuqadaha kale, ka dibna 0 luuqado badan oo dheeraad ah — ama gal **ReportFraud.ftc.gov**.
- Ogaysii Garyqaanka Guud ee gobolkaaga. Waxaad macluumaadka xiriirka ka heli kartaa **NAAG.org**.

## ▶ La falgal

- Xasuusnow: Difaacaaga ugu wanaagsan waa shaqaale wacyigoodo diyaarsan yahay. Kala hadal shaqaalahaaga sida burcadnimadu u dhacdo.
- La wadaag buugaan shaqaalahaaga.
- Kala soo dag nuqullada buugga bilaashka ah **ftc.gov/languages**.

## Xog kusaabsan FTC

FTC waxay ka shaqeysaa inay caawiso mulkiilayaasha ganacsiyada si ay iskaga ilaaliyaan khiyaanoolayaasha, si ay u dhowraan kumbuyuutaradooda iyo khadadkooda, iyo si ay xogta macaamiishooda oga dhigaan mid ammaan ah. Si aad u hesho macluumaadka ganacsiga yaryar, gal **ftc.gov/SmallBusiness.** Halkaas waxaa ka heli doontaa xogo ku saabsan khiyaanoolayaasha diirada saara ganacsiyada yaryar iyo sida la iskaga ilaaliyo, iyo xog ku saabsan amniga interneetka ee loogu talagalay ganacsiyada yaryar si looga caawiyo mulkiilayaasha inay khadadkooda ka dhigaan ammaan.

Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay ee ganacsiyada yaryar, rukun ka noqo Shabakadda Ganacsiga FTC's ee **ftc.gov/subscribe**.

This brochure is part of the FTC's efforts to help small business owners avoid scams. It explains common scams that target small businesses and non-profit organizations, describes scammers' tactics, and provides steps business owners can take to protect their company from scams. Order print copies for free at **ftc.gov/bulkorder**.

**FEDERAL TRADE COMMISSION**

**business.ftc.gov**

Luulyo 2023